



## Heshiiska Ka Warbixinta Isbeddelka

Heshiiskani waxa uu la xidhiidhaa faa'iidooyinkan soo socda: 3SquaresVT, Kaalmada Shidaalka, Reach First, Reach Up, Reach Ahead, Qofka Qoyskaaga ka midka ah (Essential Person), iyo Waxbarashada Dugsiga Sare Kadib (PSE).

### Haddii aan helo (ama aan codsado) faa'iidooyinka 3SquaresVT:

Waxa aan u qalmaa Warbixinta La Fududeeyey waana inaan warbixin ku soo gudbiyo muddo 10 maalmood ah gudahood kadib bisha ay dhacaan isbeddeladani:

- Marka dakhliga qoyskaygu gaadho 130% kamid ah heerka saboolnimada federaalka (eeg Jaantuska Dakhliga Guud ee 3SquaresVT ee ku yaalla halka dambe); ama
- Marka saacadaha shaqada macmiilka ee wakhtigoodu xaddidan yahay ay ka hoos maraan 20 saacadood toddobaadkii/80 saacadood bishii.

### Haddii aan helo (ama aan codsado) faa'iidooyinka 3SquaresVT KELIYA:

Waxa aan u qalmaa Warbixinta La Fududeeyey. Eeg shuruudaha warbixinta ee sare.

### Haddii aan helo (ama aan codsado) wax kamid ah faa'iidooyinka ku qoran halka sare (marka laga reebo 3SquaresVT):

Waa inaad ku sheegto muddo 10 maalmood ah gudahood isbeddelada soo socda ee ka dhaca qoyskaaga:

- Xaaladda nololeed: halka aan ku noolahay, cinwaankayga, dadka ila nool, sida loo kulayliyo gurigayga ama cidda siisa gurigayga shidaalka kulaylinta.
- Dakhliga: korodhka ama hoos u dhaca dakhliga ishuu doono idinka soo gala: shaqo cusub ama waayitaan shaqo, ilo cusub oo dakhli, masruuf ilme, caydha, hawlgabka, magdhawga shaqo la'aanta, bakhtiyaa nasiibka iyo guulaha bingo, kharashyada mar la wada bixiyo, dhaxalka, ama heshiisyada caymiska.
- Kharash-bixinaha (marka laga reebo Barnaamijka Reach Ahead iyo Kaalmada Shidaalka): kharashaadka daryeelka ilmaha iyo qofka weyn ee masuulka laga yahay ee jeebka laga bixiyo ama masruufka ilmaha ee la bixiyo.
- Khayraadka (marka laga reebo Barnaamijka Reach Ahead iyo Kaalmada Shidaalka): kaydka, hantida, ama gawaadhida.
- Isbeddelada kale: marka qof kamid ah qoyskaygu uu ilme dhalo ama guursado.

### Haddii aan helo (ama aan codsado) Reach First, Reach Up, Reach Ahead ama Waxbarashada Dugsiga Sare Kadib:

Sidoo kale waa inaan soo sheegaa marka:

- Waalidka ilmahaygu uu dib ugu soo noqdo gurigayga ama marka isbeddelada ku yimaadda xaaladdiisa ama xaaladdeedu saamayso ilmahayga.
- Kiradayda ama kharashaadka guriga ee kale ay isbeddelaan (marka laga reebo Reach Ahead).
- Kaashka caddaanka ah, saamiyada, curaarta (bonds), ama lacagta ku jirta bangiga ee qoyskaygu ay wadar ahaan noqoto \$9,000 ama ka badato (marka laga reebo Reach Ahead).

### Waxa aan fahansanahay in:

- ✦ Marka aan saxeexo arjigan, waxa aan qirayaa aniga oo dhaar ku maraya, in macluumaadka aan ku sheegay arjigu ay sax yihiin oo dhamaystiran yihiin inta ogaalkayga iyo aaminadaadayda ah. Waxa aan sidoo kale akhriyey oo fahmay Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha ku qoran arjiga oo waa aan ogolaaday.
- ✦ Waa inaan ogaysiiyo Waaxda Carruurta iyo Qoysaska, Qaybta Adeegyada Dhaqaale (Economic Services Division, ESD) isbeddelada ku yimaadda xaaladayda muddada wakhtiga ah ee lagu sharraxay halka sare.
- ✦ Waxa aan isbeddelada ku sheegi karaa aniga oo ka wacaya Xarunta Adeegga Gunnada lambarka 1-800-479-6151 ama u diraya Foomka Warbixinta Isbeddelka ama ogaysiis qoraal ah Xarunta La Tacaalidda Arjiga iyo Dukumintiga (cinwaanku waxa uu ku qoran yahay dhinaca kale).
- ✦ Waa inaan la xidhiidho ESD haddii aan wax shaki ah ka qabo nooca macluumaadka ee ay tahay inaan sheego.
- ✦ Waxa aan fahansanahay in haddii aan helo gunnooyinka Reach First, Reach Up, Reach Ahead, PSE, Shidaalka, ama 3SquaresVT oo aanan u qalmin, in la iga filan karo inaan celiyo.
- ✦ Waxa aan mudan karaa maxkamadeyn ah wax is daba marin, ama ganaaxyo kale oo maamul, haddii aan jebiyo shuruucdan.

**Waxa aad eegtaa jaantuska Dakhliga Guud ee 3SquaresVT ee ku yaalla halka dambe.**

**Fadlan ku kaydso macluumaadkan diiwaanadaada.**

## Jaantuska Dakhliga Guud ee 3SquaresVT

Qotinka gacanta-bidix ee jaantuska hoose, waxa aad ka raadisaa tirada dadka ee ku jira 3SquaresVT ee qoyskaaga. Waa inaad u sheegto ESD, sida laguugu sheegay bogga hore, haddii dakhliga qoyskaagu uu ka bato xaddigan.

Dakhliga waxa kamid ah mushaharada, is-shaqaalaysiinta, caydha, magdhawga shaqo la'aanta, masruufka ilmaha, hawlgabka, bakhtiyaa nasiibka ama guulaha bingo, kharashyada mar la wada bixiyo, dhaxalka, ama heshiisyada caymiska. "Guud" waxa ay ka dhigan tahay kahor inta aan cashuurta laga jarin.

Si aad u sheegto isbeddelada, waxa aad ka wici kartaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka lambarka 1-800-479-6151, ama waxa aad u diri kartaa ogaysiis qoraal ah ama foomka Ka Warbixinta Isbeddelka:

**DCF – Qaybta Adeegyada Dhaqaale**  
**Xarunta La Tacaalidda Arjiga iyo Dukumintiga**  
**280 State Drive**  
**Waterbury, VT 05671-1500**

Waxa aad ku heli kartaa Foomka Warbixinta Isbeddelka adiga oo wacaya 1-800-479-6151, ama adiga oo booqanaya [myBenefits.vt.gov](http://myBenefits.vt.gov) si aad uga daabacato mid.

<b>Xajmiga Qoyska</b>	<b>Dakhliga Bishii ee Guud uu Yahay 130% Heerka Saboolnimada</b>
1	\$1,580.00
2	\$2,137.00
3	\$2,694.00
4	\$3,250.00
5	\$3,807.00
6	\$4,364.00
7	\$4,921.00
8	\$5,478.00
9	\$6,035.00
10	\$6,592.00

<b>Xubin Dheeraad ah oo Kasta</b>	<b>Ku dar \$557.00</b>
-----------------------------------	------------------------